SOMALI

# Guriga Daryeelka waayeelada oo dhan

Waa sidee ku noolaanshiha  xarunta daryeelka waayeelada ee Peder Lykke?

PEDER LYKKE CENTRET
VI RUMMER EN VERDEN AF LIV

# Ku soo dhawow xarunta Peder Lykke oo ah — Gurigii ugu horeeyay Denmark ee daryeelka waayeelada kala duwan

Guriga daryeelka waayeelada kala duwan waxa ku wada nool dad, uu kala duwan yahay asalkooda iyo dhaqankooduba. Dadka halkan deggan iyo shaqaalaha labaduba waa kuwo asalkooku isugu jiro daanish iyo qaar kale oo asalkoodu aanu aheyn daanish.  Deriskaaga kuugu dhow waxa uu noqon karaa mid ku hadla luqad-kale, isla markaana leh waxyaabo kale ee uu xiiseeyo, diin kalena aaminsan.

Haaddii aan nahay Xarunta Peder Lykke waanu tixgelinaa qaab nololeedka ay leeyihiin dadka halkan deggan, kala duwanaanshiyaha asaladoodana waxaanu u aragnaa wax wanaagsan. Innagoo taageero heer sare ah siineyna, waxaanu u abuurnaa qof walba, jawi nabadeed iyo waayo aragnimo - xitaa arrimaha la xiriira diinta iyo waxyaabaha kale ee uu qofku xiiseeyo.

shaqaaluhu waxa ay qabaan, amaba maanka ku hayaan in dadka ku nool Gurigan daryeelka waayeelada,  qof walba yahay mid leh wanaag u gaarka ah(unik). Shaqaaluhu waxa ay leeyihiin farsamooyin/aalado ay ku taageeraan dadka waayeelada ah, waayeeladaasoo mid walba leeyahay filashadiisa u gaarka ah ee ku saabsan wanaagga nolosha.



Shaqaalaha xarunta waxa ay ku hadlaan in ka badan 15 luqadood waxeyna ka soo kala jeedaan in ka badan 20 dal

### Qolka weyn ee Dhaqanada kala nooca ah

Qolka weyn ee dhaqanada kala nooca ah leh, waxaa loo hagaajiyey "Shaashad ifiyeyaal" (Projektorer) iyo iftiin, si looga dhigto Masaajid/Masjid, Kiniisad amaba goob kale oo saddexaad (oo lagu cibaadeysto). Ulajeedkuna waa, in dadka degaanku halkaa ku fushadaan waxyaabaha kala duwan ee ay xiisey-nayaan. Sidaas darteed qolka weyn waa mid u diyaar ah oo furan dhammaan howlaha iyo hal-abuurada dadka degaanka kuwada nool, sidaas si la mid ah ahna shaqaaluhu waxa ay ku sameysanayaan howlaha ay soo qorsheeystaan. Tusaale ahaan, waa halkan, qolka aan ku sameynno xafladda masiixiga ee reer Filibiin.
Haddii qof uu doonayo inuu guto cibaado(caqiidadiisa aawadeed), amaba qofku rabo inuu iskiis si deggen ugu wardiyo  amaba kaligiis iskaga nasto, waxaan heynaa qol aan jabaq laheyn oo deggen.

*"Waxaan daree-mayaa in la' igu soo dhoweeyey halkan. Waa meel aan iska joogi karo."*





Aad baan ugu faraxsanahay, ina-anu nahay dad badan, kala duwan, kuna wada nool Xaruntan Peder Lykke, innagoo isla wada deggen, haddana qof walba gaarkiisa ama-ba goonidiisa yahay.

**Maria Magdalena Nielsen, waa 80 jir, ka soo jeedda dalka Filibiin**

# Su'aalo iyo jawaabo

**Ma dad badan oo jinsiyado kale ka soo kala jeeda oo aan deenish aheyn baa deggen Xarunta Peder Lykke?**
Xaruntan Peder Lykke dadka ku nool asalkoodu waxa uu ka soo kala jeedaa in ka badan 15 dal oo kala duwan, laakin dadka degaankan ku nool badankood asalkoodu waa daanish. Gurigan daryeelka waayeelada dadka deggen waa kuwo garbaha isku haya, asalki ay dooonaanba ha ka soo jeedeene. Dugsi maalmeedkeenna sare iyo Xarunta howlaha dadka badan ee isticmaala xitaa asaladooda iyo dhaqanadooda wey kala duwan yihiin.

**Sideen anigu u deggenahay guriga daryeelka waayeelada kala duwan?**
Gurigaaga khaaska ah waxa aad u qaabeysan kartaa, sidi aad doonto. Halkan waxa aad ku heysataa qolkaaga fadhiga, suuli / musqul welibana leh qeybta qubeyska/meyrashada). Mar walba waxa ku diyaar ah halkan shaqaale aqoon leh, oo kaa caawinaya daryeelka iyo gar-gaarka, aad u baahan tahay. Sidoo kale waxa jirta meel la wada wadaago, taasoo laguugu soo dhoweynayo inaad isticmaasho. Sidaas si la mid ahna aad baan u soo dhoweyneynaa inaad wakhti kula qaadato reerkaaga iyo saaxibadaa.

**Raashin noocee ah baan heli karaa?**
Waxa aan culeyska saarnaa, in dadka dhammaan ay cuni karaan raashin-ka, aan sameynno iyo in dadka degaanku saameyn ku leeyihiin, waxa loo keenayo. Waad heli kartaa farriin cad oo ku saabsan, waxyaabaha (dalagyada) aan isticmaalno, iyo sida aan u karinno raashinka jikada. Shaqaalaheenna jikadu waa kuwo bartay iney xalliyaan baahiyo kala duwan.
Bil kasta shaqaalaha jikadu waxa ay sameeyaan qorshaha bisha soo socota, kaas oo tusaale ahaan maalin walba ay jirto fursad lagu xusho cunto-xalaal ah. Shaqaalaha waxay aad u rabaan iney kaa dhageystaan, haddii uu jiro dal-ab khaas ah oo ku saabsan raashinka, la keeno.



**Marka aan u soo guuro guriga daryeelka waayeelada kala duwan, sideydii hore oo kale ma u arki karaa qoyskeyga iyo saaxibadey inti aan doono,?**
Marka aad deggen tahay Xarunta Peder Lykke, waxa aad heleysaa guri-gaaga, halkaas oo laguugu soo booqan karo, hadba inti aad doonto. Dadka badankood waxyaabaha dhab ahaan ay la kulmaan ayaa ah in ey fududahay iney qaraabo (uun) ahaadaan, mar haddiiba ay joogaan shaqaale, qaada mas'uuliyadda adeegga daryeel. Taa waxa dheeraad ku ah in (adiga meesha ku nool) mar walba inta aad ku sugan tahay guriga daryeelka waayeelada ay dad hareerahaaga joogaan, fursadna aad u heysato ka qeybgalka howlaha kala duwan maalin walba.

**Halkan Gurigan daryeelka waayeelada kala duwan cidda aniga igu xukunta waa ayo?**
Marka aad u soo guurto halkan, waxa aad deggen tahay gurigaaga kuu gaarka ah, kaas oo adigu sidi aad doonto aad u habeysan karto. Adiga naftaada ayaa-na is-xukuma oo go'aansan kara, nooca howlaha aad ka qeyb qaadaneyso, diinta aad ku dhaqmeyso, iyo waxa aad cuneyso. Waxan culeys aad ah saarnaa (oo ku dadaaleynaa) in adiga iyo qoyskaagaba aan idin maqalno, sidoo kale waxaan sameyneynaa wax walba oo aan kari karno si aad ugu noolaato nolos-haadi aad weilgaaba ku soo nooleyd.

**Ma u dabaal-degtaan munaasabado kale oo aan aheyn kuwa deeninshka?**
Waxa aan mar walba baranaa caada-dhaqameedyada lagala yimid addu-unka nagu xeeran.Marka laga soo tago munaasabadaha deenishka, ilaa iyo hadda munaasabadaha kale oo aan u dabaaldegno waa: sanadka cusub ee Shiinaha, ciidda masiixiga ee Filibiin, xafladda Oktoobar-ta iyo Ciidda(mus-limiinta). Intaas waxa dheeraad ah xaflado loo dhan yahay oo sanadkiiba mar aan dhigno, kuwaas oo waddamo badan oo kala duwan uu mid walbaahiba wakiilkiisu leeyahay teendho dalkaas (xafladda loogu qabto oo ) u gaar ah. Waxaan nahay kuwo wax ka ogaada caada-dhaqameedyada kale ee (nagu) cusub, inta badanna waxaanu qaadanaa tallaabooyin(dhanka horumarka) si xafladaha aan dhigeyno ugu matalno dadka degaankan deggan asala-da ay ka soo kala jeedaan. Aad baanu ugu fur-furannahay (diyaarna kuula nahay) inaan kuu sameyno qaban-qaabo cusub, haddii ay jirto (xaflad ama dabaaldeg) aad dooneyso.

**Ma joogaan halkan shaqaale, kun hadla luqaddeyda?**
Waxaad caawimaad ka heleysaa shaqaalaha, xirfad ahaan ah qofka ugu wa-naagsan, ee kaa caawin kara baahidaada dayeel iyo gar-gaar. Ma kuu dam-maanad qaadi karno, in mar walba uu joogo shaqaale, ku hadla luqaddaada,



Xarumaha howlaha, dugsi-maalmeedka saare, Guriga daryeelka waayeelada, meelaha (fursado) adeegyada, baararka iyo kuwo kale oo badan intuba waxa ay ku midoobeen hal dallad, kuwaas oo xusas (xaflado) maalmeedkooda lagu dhigi karo xarunta.

laakin maadaama shaqaalaheennu ku hadlaan in ka badan 20 luqadood, inta badan waa suurtogal inaad hesho shaqaale, ku hadla luqad la mid ah tan adigu aad ku hadasho.

### Ma ku dhaqmi karaa diinteyda?

Haa, dhammaan diimaha waa lagu soo dhoweynayaa Xarunta Peder Lykke. Dhammaan dadka waxa ay  heystaan fursad iney ku dhaqmaan diintooda (oo cibaadeystaan), waxana ay ku cibaadeysan karaan gurigooda khaaska ah ama qolka weyn dhaqannada kala duwan ama qolka xasiloonida/shibanaanta, oo loo habeeyey hadafkaas(cibaadada). Taa waxaa la sii jirta oo aanu ku dadaalnaa in si wadajir ah aanu ugu dabbaaldegno munaasabadaha diimaha iyo dhaqannada kala duwan.

Peder Lykke Centret



**Waa imisa qiimaha lagu dego guriga waayeelada kal duwan?**
Waxaad iska bixineysaa kharashaadka ku baxa qof kasta oo guri gaar ah deggen, sida tusaale ahaan dibaaji, kiro, koronto, hiitar, tv (dr licence), taleefonka bilaha iyo raashin.

**Sideen guri uga helaa guriga daryeelka  waayeelada kala duwan?**
Si aad u timaaddo guriga daryeelka waayeelada waa in degmadu ku soo booqaa oo ku aragtaa. Waad wici kartaa(degmada), kulanna waad la yeelan  kartaa adigoo u diraya telefoonka 33 66 33 66. Markaas waxey qiimeynayaan, bal inaad heli karto hal boos . Qiimeynta waxa lagu saleynayaa xeerarka degmada iyo heerka adeegga, kaas oo ay jaan-gooyeen siyaasiyiinta. Marka ay (shaqaalaha degmada kaa soo booqanaya) kuu yimaaddaan, waxa ay kuu sheegayaan waxyaabo ku saabsan fursadahaaaga, waxaad u muujin kartaa rabitaankaaga inaad  degto oo ku noolaato Xarunta Peder Lykke.

# Xaruntan Peder Lykke waxa ka jira fursado badan oo kala duwan oo aad ku sameyn karto waxyaabaha adigu aad xiiseeyso



**Sideen guri uga helaa guriga daryeelka waayeelada kala duwan?**

Si aad u timaaddo guriga daryeelka waayeelada waa in degmadu ku soo booqataa oo ku aragtaa. Waad wici kartaa(degmada), kulanna waad la yeelan kartaa adigoo u diraya taleefonka **33 66 33 66**

## La xiriir

**Xarunta Peder Lykke**
Degmada Kobenhagen

Peder Lykkes Vej 63-65
2300 København

Taleefoon 3234 4387

www.pederlykkecentret.dk

